# RIBADA



DABACAADDII 1AAD

FAARAX AXMED CABDI

# BISMILLAAH

## HIBEYN

Buugan waxaan ugu uhibeeyey dadkeena muslimka ah jecel xalaasha iyo in ay akhristaan kana faaideystaan isagoo akhriskiisa iyo gunaanadkiisa wakhti badan uusan ka qaadanayn

Sidoo kale buugan waxan u hibeeyey waalidkeyga hooyo **saafi maxamed siciid** ilaahay cimri dheer iyo cibaado suuban ha siiye (aamin) iyo aabe **Axmed abdi shibiin** ilaahy meeqam sare iyo maca nabiyiin haka yeelo (aamin) waxan ka codsan qofkasta dhiganahan fura inuu ducada al waalid uu aaminta u raaaciyo.

## AFEEF

Mowduucan uu dhigahan yar ka hadlaayo waa mowduuc aad ubalaaran

Oo culumo badan ay ka qoreen maqaalo waaweyn inkasto uu ku daabacan yahay luuqado kale aan ahayn af somaali taas ayaa igu dhalisay inaa weeleyo inta yar oo irdo fur u noqon karta qofkasta raba inuu faham fiican ka qaato ribada iyo waxay tahay isago kaga boganaya afkiisa hooyo ,xogtii uu raadinayey hal meel iskuso aruurto

MAHADNAQ

Waxaan halkan ugu mahad celinayaa culimadeena, aqoon yahankeena aan inagala bakhaylin inay ina siiyaan talooyin wanaagsan intaan qorayay kitaabkan yar aan ka helay xog balaaran ,dhiganayaal ay qoreyeen iyo muxaadaroyin mug iyo miisan leh ay inasoo gudbeen kuwaaso duuban raandhiis dambe unoqon kara jiilalka dambe

Sidoo kale waxan umahadcelinayaa qofkasta dhiganahan akhriyey oo wax ka faiidayey una gudbiyey walalihii

Xadiis rasuulka (SCW) (لا يشكر الله من لا يشكر الناس)

(Alle uma mahad celin qofkaan dadka u mahad celin).

# Tusmada buugga

HIBEYN .......................................................... 4
AFEEF ............................................................ 5
MAHADNAQ ................................................... 6

Micnaha ribada ................................................ 8
Tariikhda ribada .............................................. 9
Noocyada Ribada ............................................ 10
Halista ribada u leedahay qofka iyo mujtamaca .... 13
Xukunka ribada ............................................... 16
Cuquubada ribada ........................................... 16
Sidee looga toobad keeni karaa ribada? ................. 18
Gabay ribada .................................................. 19
Tixraac ......................................................... 21

# Micnaha ribada

Ribada macnaheedu luuqad ahaan waa siyaado (dulsaar). koritaanka ama kor ahaanta ama sareynta

Ribadu waa ziyaado wax lagu kala ziyaadsado marka wax lakala amaahdo,iibsado, ama laka badalanayo.

Sharci ahaana waa siyaado (dulsaar) waxyaabo gaar ah, sida amaahda iyo laba shay laysku badalanayo oo la kala badiyo iyadoo in la kala badiyo aanay ahayn

Sido kale waa siyaadinta labo shay oo la isku bedelanaayo midkood asagoon siyaadadaasi wax bedel u ah uusan jirin.

Ribadu waxay ka mid tahay waxyaabaha ilaahy (SW) uu ka xaraantinimeyey adoomihiisa

wuxuu Allah yiri " Alle wuxuu inii xalaaleeyey beeca, wuxuu idinka xaaraameeyey ribada qofkii waanada rabi u timid kana joogsoodey wixii markaas tagey amarka alle u sugnaatey qofkii ku laabta kuwaas asxaabta naarta noqonayaan waana ku waarayaan ).

wuxuu kaloo Allah yiri;( kuwa Allaah iyo Nabi Muxamed NNKH Rumeeyayow Allaah ka cabsada kana tagga wixii Ribada ka haray haddii aad tihiin Mu'miniin) ( Haddii aad kategitaankaas sameyn weysaan u diyaar garooba la dagaalam allah xaggiisa iyo Rasuulkiisa xaggiisa , Haddiise aad toobad keentaan waxaad leedihiin Raasamaalka xoolihiina adinka ooaan waxba dulmineynin adinkana la idin dulmineynin)

Nabigeena NNKH wuxuu yiri : ( lacnad haku dhacdo midka ribada cunaayo, kan dadka siiya, kii goobjooga ahaa iyo kii wax qorayay)

# Tariikhda ribada

Halganka nooluhu ugu jiro in uu kaga xoroobo ribadu wuxuu la cimri yahay ribada lafteeda cimriga ribadana inkasto la hayo raadad qadiim ah hadanna lama garanayo waqtigii aysoo bilaabatay cidii bilowday iyo meshi ayka bilaabatay middoodna raadadka ugu da'da weyn ee lagu xuso ribada waxaaa kamid ah qoraal dhagaxeedyo uu katagay Hummarabi boqorkii babylonia (2123-2081-CH).

Qoraalada ku xardhan dhagaxantaasi waxay muujinayaan dulsaarka ugu badan ee laga qaadi jiray deymaha kala duwan waxay sidoo kale xambaarsan yihiin talooyin la siinayo dadka iyo ganacsatada la xiriira siyaababaha kala duwan ee ribada looga badbaadi karey

Sidoo kale Rabida ama dulsaarka ayuu Aadanuhu adeegsan jiray, iyada oo la kawsatay ganacsiga. Inta laga war-qabaana soo taxnayd 7,000 oo sanadood. Kitaabka Baybalka oo ka mid ah kutubta ugu faca weyn, waxaa ku yaala Yuhuudda oo laga xarrimay Ribada

Sidaas oo ay tahay, ayuu haddana Aadanuhu isku dul-nool yahay. Oo uu ku dheggan yahay, inuu kala qaato dulsaarka.

## Noocyada Ribada

Ribada waa labo nuuc

### 1) Ribo deynta gasha

Ribaa Al-Nasii’ah  waa Deynta oo lacag la dul saaro

Deyn walba oo aad bixisaa qofkii bixiyaa nafci/faaiido u keentaa waa ribo. sidoo kale qofka aad deynta bixinayo in uu dhaho wax ii soo garo marka deynta iikeyneyso waa ribo, balse qofka deynta qaatey haduu asaga u soo garto waa asxaan asxaan ku gud.

Tusaale 1: qof ayaa wuxuu bixinayaa deyn cadadkeyda yahay 500/shan boqol markaa wuxuu shardi ugu dhigayaa in halkii boqol uu soo raaciyo 20/ labaatan, lacagta mar uu qofka soo celinayo waxa noqoneysaa 600/lix boqol, waxaa saaran 100/boqol riba ah.

Tusaale 2: qof ayaa boqol deyn qaatey wax shardi ah laguma xirin, qofii deynta siiyey ayaa ku dhahay deynteyda isii mudadii waa la joogaa, qofka deynta qaatey ayaa dhahay mahaayo, kii deynta bixiyey ayaa dhahay mudada waan kuu kordhi balse waa ii kordhin boqolka deynta ah, waxaa ii keeni laba boqol mudada kale, boqolka uu saartay mudada kale waa ribo.ribada qaabkan sidoo kale waxaa loo yaqaan riba al jahiliya

waa in ruux wax (tirsan) la amaahiyo oo waqtina loo qabto kadibna hadii waqtigaa lagaaro ama la dhaafo qiimihii hore wax lagu ziyaadiyo. Tusaale ruuxbaa sheey ku deeynsaday lacag ah $100 dollar, bil ayaana laga rabaa in uu ku bixiyo lacagtaas. Waa uu awoodi waayay in uu lacagtii ku bixiyo, hada marka waa in uu bixiyaa $110 dollar.

## 2) Ribo iibka gasho.

Ribaa Al Fadli waa ribada gasha raashinka iyo lacagaha isku midka ah

**Ribo raashinka** sidee ribada ugaleysaa Raashinka waa raashin raashin lagu iibinayo, laba shey isku mid ah Timir iyo Timir, Galey tuman iyo Galey aan tumneyn la iskuma badalayo, waa in isku jinsi yihiin oo waxba ku kala dubneyn, marka la isku iibinayo sadax shey ayaa laxaqiijinaya,

• in aanu jirin wax muda ah, labada dhinac midkood mudo qabsado waa ribo.

• inay kala badnaadaan lama ogola, laba kiish waa in isku jin yihiin hal kiilo in ay isdheeraadaan lama ogola, hal kiilo oo timir ah in lagu badalo laba kiilo timir ah lama ogola, kiish bariis ah in lagu badalo laba shiisho oo bariis ah waa ribo.

• in meesha lagu kala qaato ayaa sharti ah, intaa lakal tagin. balse hadii labada shey ee laka badalayo kala duwan yahay bur iyo bariis yahay qodobka labaad ayaa meesha ka baxayo oo ah is ay isku jin yihiin wey kala badnaan karaan, balse labada qodob kale waa la la imaanayaa. Qodob kale ayaa meesha ku jira oo ah laba shey ee isku midka ah timir iyo timir oo midkood fiican yahay maxaa la sameynaa, waa in la iibiyaa timirta aan fiicneyn kadibna lacagta lagu iibiyey ayaa timirta fiican lagu soo iibsanayaa hadba in ay kuu gowso lacagtaada, waxaana banaaney in aad dhahdo timirta timita ugu badal lacagna waan kugu darayaa.

**ribo iibka iyo sarifka gasho** : dahabka, fidada, lacagta warqada aan is ticmaalno intaba ribada wey galeysaa, maxaa https://t.me/somalibooks Dhis Seeska Ganacsigaaga - 40 - Cabdiraxmaan Xasan Shire lagaa doonayaa hadii dahab dahab ku badaleyso waa in ay isla ekaadaan garaam go an noqdaan,waxaa kaloo la eegayaa nooca dahabka ku kala dubneyn midabka,waxa ku qoran iyo xajmiga,qof haduu doonayo in dahabkiisa loogu badalo dahab kale waxaa shardi ah in marka hore iibiso dahabkeyda lacagta qaadato markaa ka dib iibsato dahab kale ee jeclaatey hadii lacag lagu daraayo ay ku darto

Hadalkii rasuulkeena nnkh : ( Ha iibinina dahabka dahab haku iibinina, qalinkana qalin haku iibinina, burkana bur haku iibinina, shaciirkana shaciir haku iibinina, timi timir haku iibinina, cusbo cusbo haku iibinina ilaa hadaad saas sameyneysaa isku jin ha a haadaan isku nooc ha a haadaan hoo hoo halagu kala qaato nuucyada hada aan soo sheegney is khilaafaan iibiya saa doontaan hadeyba tahay mid aad gacmaha is galisaan ).

## Halista ribada u leedahay qofka iyo mujtamaca

Wuxuu Islaamka aad u dhaleeceeyey arrinka ribada waxa uu u leeyahay darteed raadad baabbi'in ah qofka iyo bulshada waxaana ka mid ah:

1) Waxaa meesha ka baxaya isku dheellatirnaanta qaybinta maalka oo waxaa dhalanaya kala duwanaansho weyn ee u dhexeeya hodanka iyo fuqarada.

   Waayo ribada waxaa uu maalka ku koobmayaa gamacaha dad yar oo ka mid ah bulshada isku midka ah, wuxuuna ka qadinayaa dadweyne aad u badan, arrinkaasina waa cillad xagga qaybinta maalka, marka bulshadu waxay isu beddeleysaa dad yar oo maalqabeenno ah heysta maal aad u tiro abdan, iyo fuqaro ama dad aan waxba heysan, arrinkaasina wuxuu keenayaa is naceyb iyo kala fogaansho iyo dambiyo ka dhaca bulshada dhexdeeda.

2) Ka caado yeelasho luminta maalka Iyo wax kaydsi la'aan:

   Sahlidda amaahaha la saarto faa'ida waxay ku dhiirra gelisay dad badan inay lumiyaan lacagta oo aanay waxba kaydsan, waayo wuxuu helayaa cid amaahineysa wax kastuu doono, sidaas darteed dan uma galaya waqtigaas uu joogo iyo arrinka mustaqbalkiisa, wuxuuna ku talax tagayaa arrinka iibsashada waxyaalaha uusan u baahi qabin ilaa ay ku ururaan deymaha oo ku ciriiri noqoto nolosha, wuxuuna ahaanayaa cimrigiisa oo dhan mid ku culaabeysan deymaha iyo amaahyadaas.

3) Ribadu waa sabab keenta inay ka joogaan hodanka inay maal gashadaan mashaariicda wax tarka u leh dalka.

   Waayo wuxuu ka helayaa qofka maalka iska leh arrinka ribada fursad uu ku helo kor saar u fuula maalkiisa, arrinkaasina wuxuu

ka celinayaa inuu maal gashto mashruucyada sancada iyo beeraha iyo ganacsiga si kastaba qiimo ha ugu lahaadeene bulshada, waayo waxaa ku jira xoogaa haliso ah oo u baahan nooc ka mid ah dadaal iyo shaqo.

4) Ribadu waa sabab keenta barako darro ku dhacda maalka iyo burbur dhaqaaleed.

Dhammaan burburrada dhaqaaleed iyo musallafka ku dhacay shirkadaha ama dadka qaar waxaa u sabab ahaa ku sii socodka ribada xaaraanta ah, waana mid ka mid ah raadadka barako ka qaadidda uu Allaah noo sheegay, sidaasoo aanay ahayn sadaqada iyo u sama falka dadka, waayo waxaa ku barakooba maalka oo kobcisaa,

sida uu Allaah kor ahaaye yiri:

“Allaah ma barakeeyo Ribada, oo sababaa Sadaqooyinka inay bataan”. (Al-Baqarah: 276).

**Sidoo kale halista rabida ka dhalata ribada waxa kamid ah**

In dhaqaalihii loo jiheeyo jiho aan Alle iyo Rasuulkiisa midna ogolayn

Akhlaaqda iyo iyo ruuxdaba way xumaysaa (qanigii ayaa faqiirkii ku shaqaysanaya).

Maalkii muslimiinta oo gacanta cadawgooda galay, ribadii kasoo baxdaynamarkay diideen hub muslimka lagu laayo lasiistay.

Ribadu waxay dishaa naxariista.qofka uu naxariisan lahaa walaalkii

**Sidoo kale cawaaqib xumad iyo ciqaabka ribada ka dasha waxa kamid**

Ribadu waa waxyaabaha cadaabal qabriga sababa.

Ribadu waa waxyaabaha ugu waaweynee umadaha lagu halaago.

Ribadu waa waxyaabaha ummadaha lagu dooriyo.

Ribadu waa70 baab (qaybood) shirkiguna waa la mid.

Maalka ribadu gasho sadaqadeeda Allema aqbalo.

Ducada riba cunaha Alle ma aqbalo.

Ribadu waxay kala dhex gashaa qofka iyo khayrka, waayo ujeedada deynta islaamku ka leeyahay maaha adduunyo ee waa samo fal.

Nacdasha (naxariis ka fogaynta) Alle waxay dusha ka saarantahay cidda ribada cunta, markhaatigeeda gasha iyo cidda u kala qortaba

Dadka ribada cunaa aakhiro waxay imanayaan iyagoo sidii qof la derderay (waalan) ah

Ribadu waa dhaqanka yuhuudda

# Xukunka ribada

Ribadu waa xaaraan ku cad xaaraantinnimadeeda Qur'aanka iyo axaadiista Nabiga (SCW) waana mid ka mid ah dunuubta waaweyn, Allaah uguma gooddin axadna ka mid ah caasiyaasha dagaal uu ku qaado aan ahayn dadka cuna ribada ee ku dhaqma, xaaraantinimeynta ribada wuxuu ku soo arooray sharciyada iyo kutubtii horey Allaah uu soo dejiyey oo ma aha islaamka keliya, laakiinse xukunkaa waxaa ku dhacay doorin iyo beddelaad sida ay ugu dhaceen qeyrkood axkaanta, Allaah Kor ahaaye wuxuu yiri isagoo caddeynaya sababta cadaabkiisa iyo carada uu u qabo dad ka mid ah ehlu kitaabka:
"Iyo qaadashadooda Ribada iyagoo xaqiiq laga reebay inay qaataan" (An-Nisaa: 161 (و أَخْذِهِمُ الرِّبَا وَقَدْ نُهُوا عَنْه) (النساء: 161).

# Cuquubada ribada

1. Qofka isticmaalka ribada wuxuu u bandhigaa naftiisa dagaal Ilaahay iyo Rasuulkiisa, oo sidaas ku noqdaa cadow Ilaahay iyo Rasuulkiisa, Allaah Kor ahaaye wuxuu yiri:
   (فَإِنْ لَمْ تَفْعَلُوا فَأْذَنُوا بِحَرْبٍ مِنَ اللهِ وَرَسُولِهِ وَإِنْ تُبْتُمْ فَلَكُمْ رُءُوسُ أَمْوَالِكُمْ لَا تَظْلِمُونَ وَلَا تُظْلَمُون) (البقرة: 279)
   "Haddiise aydaan falin sidaa, markaa ku tala gala dagaal uu idinku qaado Allaah iyo Rasuulkiisu, oo haddaad toobad keentaan, haddaba waxaad mudan doontaan raasumaalkiinna, waa inaydaan wax u dhimin (deyn qabaha) oo kor saar ka qaadan, idinkana waa inaan waxba la idinka dhimin (raasumaalkiinna ka mid ah)". (Al-Baqarah: 279)

Waa dagaal leh raadadkiisa nafsiga iyo jirka, waxana ku dhacay dadka maanta oo leh welwel iyo walaac iyo murugo iyo feker ma aha waxaan ahayn miraha dagaalkan loogu baaqay qof kastoo khilaafa amraka Ilaahay oo cuna ribada ama cid ku kaalmeeya, ee bal ka warran raadka dagaalkan aakhirada.

2. Qofka cuna ribada ee ku dhaqma waa malcuun laga eryey Naxariista Ilaahay isaga iyo qofkii ku kaalmeeya arrinkaa, Jaabir τ wuxuu yiri: "Rasuulka Alle ρ wuu lacnaday qofka cuna ribada iyo qofka siiya iyo qofka qora iyo labadiisa markhaati" oo wuxuu yiri: "Dhammaantood waa isku mid" (Muslim 1598)

3. Qofka cuna ribada waxaa la soo saarayaa maalinta Qiyaamaha isagoo muuqaal xun sida qof daan daan ah sida qof suuxdin qaba iyo waalli, sida uu Allaah Kor ahaaye yiri:
( الَّذِينَ يَأْكُلُونَ الرِّبَا لَا يَقُومُونَ إِلَّا كَمَا يَقُومُ الَّذِي يَتَخَبَّطُهُ الشَّيْطَانُ مِنَ الْمَسّ ) (البقرة: 275)
"Kuwa cuna Ribada uma kacaan waxaan aheyn sida mid uu sheydaan ku daandaanshay taabasha (diisa) u kaco". (Al-Baqarah: 275)

4. Maalka ribada ah haba badnadee waa mid laga qaaday barakada, ribo qaataha kama helo raaxo iyo farxad iyo xasillooni waxa uu qaato, sida uu Allaah Kor ahaaye yiri:
( يَمْحَقُ اللهُ الرِّبَا وَيُرْبِي الصَّدَقَات ) (البقرة: 276)
"Allaah ma barakeeyo Ribada, oo sababaa Sadaqooyinka inay bataan". (Al-Baqarah: 276)

## Sidee looga toobad keeni karaa ribada?

Qofkii u toobad keena Allaah isagoo horey u galay heshiis ribo, wuxuu leeyahay labo xaaladood middood:

1. Hadduu isagu yahay qofka qaadanaya korsaarka iyo faa'idada (ribo qaataha) wuxuu qaadanayaa raasu- maalkiisa mana qaadanayo wax ka mid ah kor saarka ziyaadada ah isla durba markuu ka toobad keeno, sida uu Allaah Kor ahaaye yiri:
   {وَإِنْ تُبْتُمْ فَلَكُمْ رُءُوسُ أَمْوَالِكُمْ لَا تَظْلِمُونَ وَلَا تُظْلَمُونَ} (البقرة: 279)
   "Oo haddaad toobad keentaan, markaas waxaad mudan doontaan raasumaalkiinna, waa inaydaan wax u dhimin (deyn qabaha) oo kor saar ka qaadan, idinkana waa inaan waxba la idinka dhimin (raasumaalkiinna ka mid ah)". (Al-Baqarah: 279)

2. Hadduu isagu yahay kan bixinaya kor saarka ziyaadada ah, wuxuu leeyahay labo xaaladood:

- Hadduu awoodo inuu buriyo heshiiska oo ka baxo dhibaato la'aan weyn waa ku waajib inuu sidaas falo.
- Haddiise uusan awoodin inuu buriyo heshiiska oo ka baxo dhibaato weyn oo kala soo gudboonaaneyso darteed, markaasi wuxuu dhammeystiri heshiiskaa isagoo go'aansan inuusan u laaban doonin isagoo kale, sida uu Allaah kor ahaaye yiri:
  (فَمَنْ جَاءَهُ مَوْعِظَةٌ مِنْ رَبِّهِ فَانْتَهَى فَلَهُ مَا سَلَفَ وَأَمْرُهُ إِلَى اللهِ وَمَنْ عَادَ فَأُولَئِكَ أَصْحَابُ النَّارِ هُمْ فِيهَا خَالِدُون)(البقرة: 275)
  "Ee qofkii haddaba waano uga timaaddo Rabbigi markaa iska daaya, wuxuu leeyahay wixii horey u tagey; oo arrinkiisa Allaah buu la jiraa; qofkiise u noqda, waa kuwaa ehlu Naarka, way ku dhex waari doonaan". (Al-Baqarah: 275)

## Gabay ribada

Gabaygan waa tiriyey abwan luqman waana dardaaran u kula dardaarmay ninkii saxiib ah oo dukaan ama goob ganacsi furtay sidoo kale waa talo iyo tusaale bulshada afka somaaliga ku tiraabta ay ku fahmayaan cawaaqib xumad ribada iyo raandhiska dambe een aan la mahdin ay leedahay

Rays lagama gaaro caliyow ribadu waa hooge

Run baa fiican been ba rako ah lagu rafaadaye

Ruuxa rabto jeceshahad talo ugu roonaane

Rayigii ka maqan iyo xaqbaa lagu rakadaaye

Oo rays lagama gaaro caliyow ribadu waa hooge

Rasamaaalka aad ay haysatay balo rakaadaye

Raaskiyo iyo rugta dagantahay raran ku beertaye

Adoo ramaga geel maalaya baad gaajo rogataaye

Adoo raaxo jiifa rafaad dalaq tiraahdaye

Rabi baa dagaal kula galo lagugu riiqaaye

Shafeecadii rasuulkeeni bay ka rafidisaaye

Raxmadii ilaah iyo adigay kala dhex roortaye

Rays lagama gaaro caliyow ribadu waa hooge

Hadii been lagaa raridoo ribo laguu dhuubo
Dacayaad raqiis iyo war aan jirin raad raacdo
Waa rafaad aduun aakhirana rarankii naareed
Hadii aad risiqa baacsato dunida raacdayso
Ruclo iyo hadaad orod gasho ribo kusoo hoyso
Waa rafaad aduun aakhirana rarankii naareed
Hadii rubaabad tagtiyo boqol kun oo raana
Ribix iyo macaashkay dhasha malaha raandhiis
Rays lagama gaaro caliyow ribadu waa hooge

Ruuxaga waxa lagu guba rarankii naareed e
Caloosha rasaysa rasaas lagu cabeeyaye
Raxmadii ilaah iyo adigay kala dhex roortaye
Shafeecadii rasuulkeeni bay ka rafidisaaye
Rabi baa dagaal kula galo lagugu riqaaye
Waa rafaad aduun aakhirana rarankii naareed
Rays lagama gaaro caliyow ribadu waa hooge

Tixraac

1) https://imuslimguide.com/so/financial-transactions/2
2) Buuga bangiyada islaamka ee uu qoray aqooyahan siciid cali shire
3) http://www.haatufonline.com/somali-news/ribada-la-jiifiyaana-banaan-la-joojiyaana-banaan//
4) Buuga Dhis seeska ganacsigaaga ee  uu qoray qoraa cabdiraxmaan xasan shire
5) Youtube (muxaadaroyinka ka hadlaya ribada)



Faarax axmed cabdi

Oraahda qoraha buugga

Ilaahayow adigaa mahadle waad na abuurtay oo waad na hanuunisay oo aad na arsaaqday

Ilaahayow waxaa kuu sugnaatay mahad ilaa inta aad raali ka noqoto mahad ayaa kuu sugnaatay markaad raali noqoto kadib naxariis iyo nabad gelyo nebigeeni suuban dushiisa ha ahaato

Ribadu waxay ka mid tahay Waxyaalo Ilaahay Xarrimay Dadkuna ay Fududeysteen In La Isaga Digana Ay Waajib Tahay qofkasta muslima uuu mudan yahay  inuu cod dheer iyo mid gaaban ba kaga kasoo hor jeesto

walaalahi islaamka ee lagu ibtileeyey laguna imtixaanay uu waano iyo wax usheeg ka hagran kuna daawan haadanta iyo boholaha madow ay kusii shalwanayaan( hoobanayaan)

Ribada diid

Waa rafaad iyo hoog aduun

aakhirana rarankii Naared



**wa bilaahi tawfiiq :wasalaamu calaykum wa raxmatulaahi wa barakaat**

# ALHAMDU LILAAH